



### Kusoo dhowoow Center för Språkintröduktion på Lindholmen!

Iskuulkan waxaa loogu talagalay ardayda da' doodu u dhexeyso 16 illaa 20 sano.

Iskuulkeena waxaad kub aran doontaa luuqadda Iswiidhishaka iyo sida bulshada iswidhisku u nooshahay. Waxaad ka bilaabeysaa waxbarashada meel ku haboon wixii aad hore usoo baratay, taasoo aasaas wanaagsan u noqoneysa talaabadaada waxbarasho ee tan ku xigta.

Marka lagasoo tago luuqadda Iswiidhishka, waxaa kale oo aad baran doontaa maadooyinka ciyaaraha, cilmigabulshada, Ingiriiska, sawirka iyo xisaabta. Waxaa kaloo duruursta kamida booqasho waxbarasho iyo waxqabadyo kale oo ka dhaca goob aan iskuulka ahayn.

Iskoolkan waxaad dhigan doontaa 1–2 sano. Markaa kadib waxbarashadaada waxaa kusii wadan doontaa iskuul kale.

Goortaa iskuulka bilowdo, waxaa lagu siin doonaa kaarka baska, kaarka cuntada, kombiyuuter iyo bugaag. Hadii ay kaa lumaan kaararka baska ama cuntada waxaad soo wargalineysaa xafiiska iskuulka. Waxaa lagaa caawin doonaa in lagu dalbo kaarar cusub, laakiin waxaad bixineysa khidmadda adeega. Kombiyuuterka waxaad u isticmaalaysaa shaqada, waase inaad soo celisaa hadii aad iskoolka joojiso. Buugaagta iskoolka lagaa siiyo iyagana sidoo kale waa inaad soo celisaa marka iskuulku kuu dhamaado.

### Macalikaaga/mentorkaaga

☒ Xiriirkaaga ugu muhiimsan ee iskuulka waa macalinkaaga, macalinkaagu waxa uu qorsheynayaa waxbarasadaada iyo guud ahaan sidaad iskoolka ku tahay. Hadii aad xanuunsato oo aad soo gaariweyso iskuulka, waa muhiin in masuulkaaga ama adigaba aad fariin soo gaarsiisaan macalinkaaga. Hadii aad xanuun uga maqnaato iskoolka wax ka badan hal usbuuc/sitimaan, waa inaad cadayn kala timaadaa dhaqtarka.

### Waxaan kaa fileynaa

Iskoolku waa sida shaqo oo kale, waa muhiim inaad cashiradoo dhan ku imaatid waqtigooda isla markaana kasoo shaqeytid layliyada oo dhan.

Waxaan kaa fileynaa inaad waxba reeban oo aad dadaasho si aad waxbarashadaada ugu guuleysatid.

U naxariiso ardayda kugu iskoolka ah iyo macalimiintaba. Waxaad raaceysaa sharciyada iskuulka.

### **DADAAL OO NAXARIISO**

***Tani waa halkudhagga iskoolka.***

***Marwalba waxaan samayneynaa wixii awoodeena ah waana isu naxariisanaynaa.***

### Sharciyada iskoolka

- ☒ Waxaan isu muujineynaa xaqdhowr iyo ixtiraam inagoo ilaalineyna waqtiga casaharada booqashooyinka waxbarasha iyo kulamada dhammaan.
- ☒ Waxaan isu muujineynaa saaxiibtinimo iyadoo qofba qofka kale uu ka taxadarayo la isna caawinayo.
- ☒ Kuraasta ayaan miiska saareynaa qalabkana waa kala aruureynaa cashirka ugu danbeeya kadib.
- ☒ Waxaan ilaalineynaa nidaamka qalabkeena, waana ka taxadareynaa.
- ☒ Waxaan ku isticmaaleynaa mobiladeena fasalka dhexdiisa hadii macalinku ogolaado.
- ☒ Macalinku wuxuu la wareegi karaa telefoonka, kombiyuuterka ama qalabkii kale ee loo isticmaalo qaab cashirka wax u dhimeysa.
- ☒ Iskoolku wuxuu dacwad gaarsiinayaa booliska hadii ay imaatohanjabaad gacankahadal, daroogo ama waxyeelo.